



# 7

## Balanbaalisyahay duul

Halka xaajiyadda John Walker taallo markii aannu marayno ayaannu aniga iyo Mahdi isa salaannay. Isagu hore ayuu isaga sii socdey. Aniguna waxa aan xagga danbe kaga tiirsaday gaadhiga buudhigiisii. Si aan ugu sugo cid aan garanayo oo iyana sidayda oo kale ka soo hormartay saacaddii iskuulka la furayay, ayaan ku fadhiistay birta yar ee astada gaadhiga ka sarraysa. Gaadhiga dushiisa waxa ka soo laalaada laamaha gobka ah ee ka soo dul mudhay gidaarka iskuulka. Geedka gobka ahi gudaha iskuulka ayuu ku yaallay, laamuhuse inta ay gidaarka soo dulmareen ayay hadheeyeen debedda halka gaadhigu yaallo. Laan ka mid ah ayaan dareemay in ay ka laallaado qolof cawlani, qaab daran, oo aad mooddo xuub caaro. Saan ku dhawaaday ayaan dareemay in ay tahay qolofta dirindiir qallashay. Wax dhintay ayay ila ahayd muuqaalka. Waan taabtay. Wax dhintay bay ahayd. Kelinnimada meesha aan fadhiyo iyo waxa ay tahay mooyee, aad baan ugu fiirsaday qoloftii. Saa waabay dhaqaaqday kaligeed, sidii eegmadaydu ka kicisay hurdo dheer oo ay la suulsanayd. Shimbiro geedka buul yar ka samaysanayay ayaa iga qalin daaray eegmadii aan ku dhaygagsanaa. Waxa aan ku soo dhawaaday mar kale bakhtigii igu dhaqaaqay, aniga oo ka fekeraya sagagarkii iska ag taagnaa ninka bidaarta leh ee shaqaysanaya, ee waliba ka ag calaacalayay. Isaguba naf muu lahayn ayaan is idhi. Dayacnaantii ka muuqatay qawsaarka, iyo naf la'aantii qolofta dirindiirta ayaa isaga kay ekaaday. Aniga oo arkaya ayay qoloftii dirindiirtu igu noolaatay. Isaguna isaga oo na arkaya in aanu arkayno ayay haddana naf la'aantiisii iska sii jirtey. Waxa markiiba jabay afkii qolofta dirindiirta ee hoos u jeeday. Waxa ka soo muuqdey wax aad mooddo laba gees oo jiljilicsan. Waxa aan arkayay bakhtigii cawlanaa oo inyar-inyar dib ugu noolaanaya. Madax yar oo rafaadsan, oo xoog iyo tamar ku bannaysanaya dariiqa cidhiidhiga ah, ayaa ii xigay. Waxa aan is idhi nololi waa taa. Laba minjood oo dhaadheer, oo jalaqsan baa mudh iska soo daba yidhi. Xuub aad mooddo in xariir laga sameeyey, oo casaan diggoon iyo doog khafiif ah isugu jira ayaa ka soo baxay. Labada midab ee casaanka iyo doogga waxa aad moodaysay in dawaar sigsaag ah si farshaxannimo leh oo isku sar go'an, loogu kala qayday. Balanbaalis qurux badan ayaa bakhtigii cawlanaa ee foosha xumaa ka dhalatay. Inta ay isku taagtay laantii ay qoloftu ka laalaadday, ayay baalashii casaanka iyo doogga ahaa si ballaadhan u kala bixisey, sidii wax ay jimicsanayso oo kale. Waxa aad moodaysay in ay hurdo subax ka soo toostey. Markii u horreysay nolosheeda ayay duushay, aniga oo wali ku dhaygagsan nolosha quruxdeeda. Naf ayaa ku jirtey. Xarragada ka muuqata ciyaarta balanbaalista, habdhaca baalasheeda, iyo quruxda leexaysigeeda, waxa aad moodaysay in ay heesayso. Waxa aan is idhi iyaba way faraxsan tahay. Waxa aan is idhi way heesaysaa.

Way duushay.

Waxa isku beegmay markii ay eegmadayda ka libidhay balanbaalistii, iyo maqalkii aan maqlay

albaabkii iskuulka oo qab yidhi. Waa la iga xidhay. Xitaa jalaska sanqadhiisa ma aan maqlayn intii aan ku dhaygagsanaa dedaalka balanbaalista kaga soo baxday godkii madoobaa ee ay nolosha ugu samraysay, ee ay ugu soo baxday bilicda nafta leh ee quruxda noloshu ka muuqatay. Waxa aan xusuustay sagagarkii ag taagnaa ninka bidaarta leh. Wax aan ku idhi ballanbaalistii iga libidhaysay "duul, duul balanbaalisyahay duul, duul oo sare u duul." Sidii ay i maqlayso ayaan codka sare u qaaday markii ay iga sii fogaatey. "Balanbaalisyahay duul. Ka durug qolofta cawlan ee aan nafta lahayn oo duul. Balanbaalisyahay duul. Dib ha iigu soo jeesan ee duul." Waxa aan dareemay in ay qurux iyo wanaag igala fogaatey, waxa aan dareemay in aan ka murugoon doono fogaansheheeda, haddana waxa aan codka sare ugu qaaday "Balanbaalisyahay duul. Haddaad igala fogaatay quruxdii baalashaada, bilicdii xarakadaada, midabyadii dushaada, anigu aan iska dayoobee duul. Balanbaalisyahay duul oo baalasha aad u kala bixi." Noolow ayaan ku idhi balanbaalistii iga libidhay. Waxa aan ka fekeray in halkaannu ku kulannay aniga iyo balanbaalistu ahayd meel dayacan, hadday maalin maalmaha ka mid ah soo noqota na ay gurigayga daaqadi ka furan tahay, oo ay ka soo geli doonto iyada oo heesaysa. Markaas ayaan ku idhi "balanbaalisyahay duul, oo haddaynu markale ku kulanno nolol, ogow daaqaddii gurigayagu way furan tahay e." Waxa aan moodayay in ay i maqlayso balanbaalistu, oo i fahmayso.

Ima ay maqlaynin. Ima ay fahmayn.

Habeenkii markii aannu isugu soo noqonnay aniga iyo Mahdi halkii aannu fadhiisan jirney fiidka, illay waatan la isu xaaraantimeeyey in dhallinyaradu debedda ku soo cawaysee, ayaan Mahdi uga sheekeeyey sheekadii balanbaalista. Waxa aan ku idhi maanta waxa aan arkay balanbaalis faraxsan, waxa uu igu yidhi:

"Sideed ku garatay in ay faraxsanayd?"

Waxa aan ku idhi "way heesaysay."

Kuye "sideed ku garatay in ay heesaysay?"

Waxa aan ku idhi "way noolayd".

"Oo sideed u maqashay waxa ay ku heesaysay?"

Waxa aan ku idhi "way qurux badnayd."

"Noloshu waa qurux lagu farxo, wax aan faraxsanaynina ma qurux badna, mana noola," ayuu igu yidhi Mahdi.

Nolosha dhadhankeedu waa dedaalka lagu gaadho nolosha lafteeda baannu is nidhi. Farxadda iyo muragadu ma aha yool la gaadho, waa laba marxaladood oo loo maro nolosha aad higsanayso. Labaduba way ku soo maraan, oo ku dhaafaan, baannu is nidhi. Nolosha lama gaadho e waa la higsadaa uun baannu is nidhi, waa daba-huwan. "Marka aad is taagto ee aad is tidhaahdo waad gaadhay noloshii aad u socotey, waa mar aad is dhiibtay" baannu is nidhi aniga iyo Mahdi. Marba xaaladdaad ku jirto meel ka door roon haddaad doonto, oo u dedaasho, waad nooshahay. Waad qurux badan tahay. "Wax dhintey ma qurxoona" baannu is nidhi aniga iyo Mahdi.